Siyaasadda JQ- Lacagta Ardayga, Ganaaxyo iyo Ujrooyin

Ardayda lagu xanbaari maayo in ay bixiyaan lacag waxbarasho sida xaalada isku qorida dugsiga ama sida xaalada ka qaybgalka fasal kasta kaasi oo loo tixgelinayo in uu yahay qayb ka mid ah qaybaha barnaamijka waxbarasho ee Degmada ee aan ka ahayn macalinka gaarka ah marka uu qaanuunku oggolaado. Si kastaba, degmadu waxay uga baahnaan doontaa ardayda-aan saboolka ahayn in ay bixiyaan lacagta buuggaagta waxbarashada, lacagta lagu bixiyo waxyaabaha la isticmaalo ma ahan mid lacag la'aan lagu helo iyo lacago kala duwan sida lagu sheegay siyaasaddan gudaheeda. Dhammaan buuggaagta waxbarashada iyo lacagaha kala duwan waxaa laga doortey dhinaca guddiga waxaana loo adeegsaday ujeedooyin la soo aruuriyay.

BUUGGAAGTA WAXBARASHADA IYO QALABKA MAKTABADA

Dhammaan buuggaagta aan la isticmaalin ee aan ka ahayn kuwa hore loogu isticmaalay koorsooyin kale waxaa lagu bixin doonaa aasaas amaah ah waana waajib in loo soo celiyo dugsiga dhammaadka muddada waxbarashada. Waxaa lagu rajo wayn yahay in ardaydu ay ku soo celin doonaan buugggaagta waxbarashadu iyo qalabka maktabadu dugsigaayaga oo ah qaab xaalad wannaagsan oo aan lagu cayaarin ee aan ka ahayn duug caadi ah. Ardaydu waa in loo qiimeeyaa wixii luma, lagu cayaaro ama buuggaagta qaabkooda laga bedelay (oo ay ku jiraan kuwa laga amaahsaday maktabada), alaabta ama qalabka. Dugsiyadu waxay u baahnaan doonaan in ay ardaydu bixiyaan qiimooyin toos ah oo isla markaasi la bixinayo qiimahaasna waxaa laga bixinayaa buuggaagta waxbarashada noqotay hanti shakhsiyeed uu ardaygu iska leeyahay. Dugsiyada Sare waxay u baahnaan doonaan ardaydu in ay bixiyaan lacag qiimo oo toos ah oo lagu bixinayo buuggaagta layliska ee koorsooyinka doorashada ah. Dugsiyadu waxay u qiimayn doonaan ganaaxyo macquul ah buuggaagta waxbarashada aan dib loo soo celin iyo weliba buuggaagta maktabada.

Haddii uu degmada dugsiga ay sameeyso dadaal macquul ah si ay u qaato lacagta buuggaagta waxbarasho ee la lumiyay ama lagu cayaaray ama qalabka maktabada, laakiin aan weli soo aruurin dhammaan lacagihii la qiimeeyay, markaasi degmada ayaa u diidaysa shahaadada,warqad qoraal ah ama darajooyinka arday kasta kaas oo ku guul daraysta in uu dib u soo celiyo ama keeni waayo buuggaagta waxbarashada wax bedelkooda gala ama qalabka maktabada dhammaadka muddada waxbarasho ama dhammaadka sanad dugsiyadeedka. Hadii ardaygu uu yahay mid qalinjebinaya/sii wadaya waxbarashada, degmada ayaa diidi doonta mudnaanta ka soo qaybgalka xaflada qalinjebinta/sii wadida waxbarashada haddii ardaygu ku guuldaraysto in uu soo celiyo ama keeno bedelka buuggaagta waxbarashada ama qalabka maktabada taariikhda xaflada.

Ardayda aan saboolka ahayn loogama baahnaan doono in ay bixiyaan buuggaagta lunta ama lagu cayaaro ama qalabka maktabada. Ardaygu looma diidi doono in uu isticmaalo buuggaagta waxbarashada ama buugggaagta layliska taas oo ku saleysan bixid la'aanta uu bixin waayo lacagta looga baahan yahay haddii taas oo kale ay daruuri noqoto si loo buuxiyo qaybta barnaamijka waxbarashada akaadiimiga ee dhabta ah.

LACAGTA LAGU BIXINAYO ALAABTA LA ISTICMAALAYO

Dugsiyada haysta oggolaanshaha maamulaha goobta waxaa dhici karta in lagu xanbaaro ardayda lacag lagu bixinayo alaabta la isticmaalayo taasi oo lagu adeegsado koorsada waxbarasho gudaheeda. Lacagaha lagu bixiyo alaabta la isticmaalo waxay si toos ah ula xariirsantahay qiimaha dhabta ah ee loogu soo adeegayo alaabtan ardayga. Lacagahaan lagu xanbaari maayo dusha ka saarid guud ah ama qiimaha lagu hormarinayo shaqaalaha. Lacagahan waxaa looga tagay ardayda aan saboolka ahayn.

LACAGO KALA JAAD AH

Dugsiyada waxaa amar lagu siiyay in ay aruuriyaan lacagaha kala duwan taas oo la samaynayo xaalada ka qaybgalka ama imaatinka hawsha dugsigu-maalgeliyo ama barnaamij aan ku jirin qaybaha barnaamijka waxbarasho ee akaadiimiga ah. Ka qaybgalka ardaygu uu ka qaybgalo hawlahaasi oo kale waxay ahaan doontaa doorasho. Ardayda waxaa la wayddiin karaa in ay bixiyaan lacago kala duwan iyo kharashka lagu bixiyo imaatinka, ka qaybgalka, ama helida alaab/qalab dhar oo loo isticmaalo hawsha ama barnaamijka uu dugsigu-maalgeliyo.

Dugsiyada waxaa dhici karta in ay qiimeeyaan lacagaha kirada aan lagu kordhinayn qiimaha tooska ah ee loo isticmaalo sidaasi oo kale kuwaas oo ah isticmaalka waxyaabaha sida marooyinka qasiidooyinka, dhararka isku midka ah ee kooxda iyo qalab dugsiga-laga leeyahay.

Ardayda ka qaybqaadata hawlaha aan u baahnayn macalin ama la isticmaalo ayada oo ku xiran xaddidaada heerka waxaa dhici karta in loo baahdo bixinta ujrooyin daboolaya qiimaha hawsha ayada oo aan jirin ficil kale oo dheeri ah oo uu qaato Guddiga Waxbarashada. Ujrooyinkan oo kale waxa ku jiri kara laakiin aanan xadaysnayn lacagaha oggolaansha, lacagaha qiimaha raashiika iyo lacagaha qiimaha safarada gaadiidka. Si kastaba, waajib ayay ku tahay macalinka iyo maamulaha in ay sameeyaan wax kasta oo ay awoodaan si ay u hubsadaan in uusan jirin arday u diida xuquuqda uu u leeyahay in uu safaradan uga qayb qaato ama hawlaha kale ee faa'iidada ka buuxda lacag la'aan darteed.

KATANAASULIDA LACAGAHA

Dhammaan lacagaha, ganaaxyada iyo ujrooyinka ee buuggaagta waxbarashada, buuggaagta layliska iyo alaabta la isticmaalo ee looga baahanyahay fasalada inta lagu guda jiro qaybta barnaamijka waxbarasho ee akaadiimiga ah waxay ahaan doonaan kuwo looga tanaasulo oo loo dhaafo ardayda aan saboolka ahayn. Loogu talo galay ujeedooyinka xadidaada hadii ardaygu uu yahay mid awooda in uu bixiyo, ardayga aan saboolka ahayn waxaa lagu qeexaa in uu yahay canug kasta kaasi oo u qalma qiimo qado lacag la'aan ah ama qiimo la dhimay oo hoos imaanaysa xeerarka dakhliga isku taga saboolka.

JADWALKA LACAGTA

Degmadu waxay diyaarin doontaa oo ay samayn doontaa codsi la heli karo liis buuxa oo ka kooban lacagaha ardayga, liiskan oo sharxaya sida lacag kasta tiradeeda looga gooyay iyo ujeedada lacag kasta laga leeyahay.

Waalidiinta waxaa lagu wargelin doonaa jadwalka lacagta ama haddii kale ku saabsan sida loogu dabakhay lacagaha laga tanaasulay, hadii lacaguhu ay yihiin kuwo iskaa ah ama kuwo khasab ay tahay in la bixiyo iyo hawsha xaddidan taasi oo ardayga laga reebi doono haddii aan lacagta la bixin. Ardayda u qalanta lacagta tanaasulaada waxay heli doonaan tanaasulaad ayada oo aan jirin ka xishoodsiin aan loo baahnayn ama kashifaad dadweynaha loo sheego baahidooda.

La ansixiyay 2 Sibteembar, 1958, 4 Sibteembar 4, 1963 iyo 22 Diseembar, 1972

Loo muraajaceeyay si loo waafijiyo habdhaqanka: taariikhda ansixinta buuga tusaalaha bixiya

Tirtirid/la muraajaceeyay 17 Juun, 2004

TIXRAACA SHARCIGGA.: C.R.S. 22-32-109(1)(U) (Lacagta buuggaagta waxbarashada loogu talagalay ardayda aan saboolka ahayn w/o lumid/halaynta curraarta)

IX Machadka Colorado Qaybta 2

C.R.S. 22-32-110(1)(O) (Buuggaagta waxbarasho ee lacag la'aanta ah ama ah lacag kiro oo macquul ah)

C.R.S. 22-32-110(1)(JJ) (Ciqaabta hadii lagu guul daraysto dib u soo celinta buuggaagta waxbarashada ama qalabka maktabada)

C.R.S. 22-32-117 (Lacagaha)

C.R.S. 22-32-118 (Lacagaha dugsiga Xagaaga)

C.R.S. 22-45-104 (Habaynta lacagaha laga soo aruuriyay ganaaxyada iyo ujrooyinka)

CALAAMADA TIXRAACA.: EFC, Adeegyo Cunto Lacag la'aan iyo Qiimo Dhimis ah

IHCD, Meelaynta Kulliyad Horumarsan